

Bogga Tilmaamaha iyo Imtixaannada lagu tijaabinaayo Aqoonta Daraawalka ee Gobolka New York

CUTUBKA 2-AAD: Sida Meel loo dhigto Shaatigaaga aad ku kaxeyn karto baabuurta



CHAPTER TWO

HOW TO KEEP YOUR LICENSE

Sida Meel loo dhigto Shaatigaaga aad ku kaxeyn karto baabuurta

Xusuusnow: *Imtixaannada tijaabada aqoonta daraawalka ee keliya ee la heli karo ayaa ah kuwa qaybaha tilmaamaha bogga ee ku saabsan sharciyada waddooyinka (Cutubyada 4-aad ilaa iyo 11-aad iyo Tilmaamaha Wadada).*

Haddii aad gasho dembi culus ee dhanka shuruucda waddooyinka amaba dhowr dembiyo yar yar, waxaad lumin kartaa xaqa aad uu leedahay in baabuur aad kaxeysa iyadoo meesha laga saaraayo amaba lagala laabanaayo shaatigaaga daraawalnimo.

“In meesha laga saaro” micnaheedu waa in shaatigaaga (ama xaq aad uu leedahay in baabuur aad kaxeysid) lagala noqday in muddo ah ka hor inta aan dib lagugu soo celinin. Waxaa laga yaabaa in laga qaado lacag ganaax ah marka lagu soo celinaayo shaatiga aad baabuurta ku kaxeyn kartid.

“Kala noqoshada” micnaheedu waa in shaatigaaga (ama xaq aad uu leedahay in baabuur aad kaxeysid) gebi ahaanba meesha laga saaray oo lagala noqday. Si aad uu hesho shaati cusub oo aad baabuurta ku kaxeyn kartid, waa in aad dib uga codsataa Waaxda Baabuurta (DMV) marka uu dhamaado xilliga ay ku eegtahay wakhtiga meesha uu ka maqan yahay amaba uusan shaqeyneynin shaatigaaga. Waxaa laga yaabaa in lagaga baahdo in aad bixiso lacago dib aad ugu codsan karto shaatiga aad ku kaxeyn karto baabuurta. Codsigaaga waxaa laga yaabaa in gebi ahaanba la iska diido haddii uu diiwaankaaga kaxeynta baabuurta uu muujinaayo in uu yahay mid xun ama aad diido inaad uu hoogaansanto waxyaabaha ay kaga baahan yihiin DMV. Waxaa laga yaabaa wakhtiga shaatigaaga kaxeynta baabuurta uu ka maqan yahay in uu ka dheeraado wakhtiga loo qoondeeyay ee ku xusan dabacaadan.

“Xaq aad uu leedahay in aad baabuur kaxeysid” micnaheedu waa fursada la siiyay darawalinta baabuurta ee ka soo jeeda gobolka dibeddiisa taas oo uu oggolaaneysa in ay baabuur ku dhex kaxeeyaan Gobolka New York. Waxey sidoo kale ka dhigan tahay oggolaanshaha uu Gobolka New York siiyay qofka aan lahayn shaatiga daraawalnimo si uu u helo shaatiga daraawalnimo ee uu bixiyo gobolka New York. Xaq aad uu leedahay inaad baabuur kaxeysa meesha ayaa laga saari karaa amaba waa lagala noqon karaa iyadoo loo cuskanaayo isla asbaabaha shaatiyada daraawalnimo ee New York. Haddii aad baabuurta kaxeysa adigoo xaqaaga in aad baabuur kaxeysa meesha laga saaray amaba lala noqday

waxaa lagugu ganaaxi doonaa si lamid ah qofka kaxeeyay baabuur isagoo shaatigiisa meesha laga saaray amaba lagala noqday.

XEERARKA GAARKA AH EE LOOGU TALAGALAY DARAWALINTA HEYSTA OGGOLAANSHAH A IYO SHAATYADA YAR

Daraawal kaste ee haysta sharciga yar ee oggolaanshaha amaba shaatiga daraawalnimo waxaa uu wajihi karaa ganaax iyo in laga qaado tallaabooyin kale ee dhanka sharciga ah. Tusaale, oggolaanshahaaga, shaatigaaga, amaba xuquuqdaada ayaa meesha laga saari doonaa muddo 60 maalmood ah waa haddii lagugu helo in aad gashay dembi culus ee dhanka shuruucda waddooyinka (saddex dhibic amaba ka badan) amaba labo kale oo dembi.

Sharcigaaga yar ee oggolaanshaha, shaatiga amaba xuquuqdaada ayaa lagala laaban doonaa muddo 60 maalmood ah waa haddii lagugu helo dembi culus (saddex dhibic amaba ka badan), amaba labo dembi oo kale inta lagu guda jiro lixda bilood ee ugu horreeya kadib markii aad heshay shaatigaaga amaba xuquuqdaada horay meesha looga saaray amaba lagala laabtay.

Waxaa intaas dheer, sharcigaaga yar ee oggolaanshaha, shaatigaaga amaba xuquuqdaada meesha ayaa laga saari doonaa muddo 120 maalmood marka lagugu helo dembiga ah inaad farriin direysay amaba aad ku mashquulsanayd telefoonkaaga.

Sharciga yar ee oggolaanshaha waa in uu qofka haysta ugu yaraan lix bilood, marka laga reebo wakhti kaste ee oggolaanshahaaga meesha laga saaray amaba lagala laabtay, ka hor inta aan lagu ballamin imtixaanka dhanka waddooyinka.

Mudada Si dhow loola Soconaayo Dhammaan Daraawalinta Cusub ee Kale ee Shaatiga la siiyay

Haddii adigoo jira 18 amaba ka wayn aad ku soo guulaysatay imtixaanka dhanka waddooyinka ee shaatiga lagu qaadanaayo, amaba aad qaadatay shaatiga kadib markii lagala noqday, waxaa si dhow lagula socon doonaa muddo lix bilood ah.

Haddii lagugu helo dembiga DWAI (khamri), xawaare dheer, mas'uuliyad darro, in baabuurta kale aad si dhow uu daba socoto, ka qaybgalka tartanka dhanka xawaaraha, amaba labo dembi oo kale oo dhanka waddooyinka ah inta si dhow lagula socdo, shaatigaaga ayaa meesha laga saari doonaa muddo 60 maalmood. Marka ay dhammaato 60-ka-maalmood, waxaa bilaaban doonaa lix bilood oo cusub oo si dhow mar kale lagula socon doono. Haddii lagugu helo mid kamid ah dembiyada kor ku xusan amaba labo dembi oo dhanka waddooyinka ah markan labaad ee sida dhow lagula socdo, shaatigaaga ayaa lagala noqon doonaa ugu yaraan lix bilood. Haddii shaatigaaga lagu soo celiyo kadib markii lagala noqday, waxaa si dhow hadana lagula socon doonaa lix bilood oo kale.

Haddii lagugu helo dembiga ah inaad ku mashquulsanayd dirrida farriimo amaba telefoonkaaga, shaatigaaga ee xilliga sida dhow lagula socday ayaa meesha laga saari doonaa muddo 120 maalmood ah.

Haddii uu ku soo Dhaco Tigidhka lagugu Ganaaxayo

Haddii uu ku soo dhaco tigidhka lagugu ganaaxayo, haa daahin— raac tilmaamaha ku qoran tigidhka si aad uu gudbiso cabashada aad qabto. Shaatigaaga daraawalnimo ayaa meesha laga saari doonaa ilaa

iyo amar dambe. Haddii aad bixin weydo jawaabta ah in uu ku soo dhacay tigidhka, waxaa lagugu heli karaa dembiga ah inaad iska indho tirtay.

Xarunta Dembiyada Waddooyinka ee DMV (TVB) waxay soo saartaa tigidhada ee xadgudubyada isku socodka waddooyinka ee aan dembiyada ahayn kuwaas oo laga bixiyo shanta qaybood ee Magaalada New York. Nidaamka TVB waxaa uu u oggolaanayaa maxkamadaha kale ee ku yaalla goobahan inay diiradda saaran kiisaska dembiyadeed. Tani waxaa qayb ka ah dembiyada kaxeeynta baabuurta sida Dembiyada Kaxeeynta Baabuurta iyadoo uu qofka Sarkhaansan yahay (DWI) iyo kaxeeynta baabuurta iyadoo qofka meesha laga saaray amaba lagala laabtay shaatigiisa Goobaha kale ee gobolka, dembiyada dhanka waddooyinka waxaa lagu qaada maxkamadda dembiyada iyo waddooyinka ee caasimadda, degmada, magaalada, amaba deegaanka uu ka dhacay fal dembiyeedka lagugu soo eedeeyay. Iyadoo aan loo egeynin nidaamka maxkamadeed ee qaybta ka ah, wade kaste ee baabuur ee uu u soo dhaco tigidhka dembiga dhanka shuruucda waddooyinka wuu is-difaaci karaa waxaana wakiil ka noqon karaa qareen.

Tigidhada Dembiyada Shuruucda Waddooyinka ee kaga soo dhaca Dibedda Gobolka

Waaxda Baabuurta ee Gobolka New York ma diiwaangeliso dembiyada la xiriira isku socodka waddooyinka ee ay ka gaystan NYS daraawalinta shaatiyada ka haysta maamulada kale ee kaxeynayaa baabuurta aan xamuulka ahayn, marka laga reebo dembiyada dhanka waddooyinka ee laga gaysto Canada. Dembiyada dhanka shuruucda waddooyinka ee laga gaysto dibedda-gobolka, marka laga reebo Canada, laguma daraayo “dhibcaha dembiyada” ee diiwaankaaga daraawalnimo ee Gobolka New York.

Si kastaba ha ahaatee, shaatigaaga daraawalnimo ee New York meesha ayaa laga saari doonnaa waa haddii aad ka jawaabi weydo tigidhka dembi dhanka isku socodka waddooyinka ee gobol kaste marka laga reebo Alaska, California, Michigan, Montana, Oregon, Virginia ama Wisconsin. Shaatigaaga weli sidii ayuu uu ahaan doonnaa mid meesha laga saaray ilaa iyo inta aad ka jawaabeyso tigidhka. Si xayiraada lagaga qaado shaatigaaga daraawalnimo amaba oggolaanshahaaga ee Gobolka New York waa inaad uu gudbisaa caddayn Waaxda Baabuurta ee Gobolka New York taas oo ah in tigidhka lagu qancay. Haddii aad tahay daraawal ka soo jeeda gobol kaste, marka laga reebo mid kamid ah lixda gobol ee kor lagu soo xusay, shaatigaaga daraawalnimo gobolkaaga ayaa meesha looga saari doonnaa waa haddii aad ka jawaabi weydo yeeritaan lagaga yeeray Gobolka New York ee dembiga la xiriira isku socodka waddooyinka.

Haddii ay da’daada ka wayn tahay 21 sano laguguna helo dembi la xiriira inaad baabuur kaxeeyneysay adigoo cabsan ama ka soo cunay daroogo (tusaale DUI) gobol kale amaba Canada, shaatigaaga daraawalnimo ee New York dib ayaa lagala noqon doonnaa ugu yaraan 90 maalmood. Daraawalada ka soo jeeda gobollada kale ee tigidhada looga jaro Gobolka New York waxay la xiriiri karaan waaxda baabuurta ee gobolkooda iyagoo kala hadlayaa sida dembiga lagu helay uu u saameynaayo.

Haddii da’daada ay ka wayn tahay 21 sano laguguna helay dembi la xiriira cabidda khamriga amaba daroogo taas oo ka dhacday meel dibedda ka ah gobolka, shaatigaaga daraawalnimo ee New York dib ayaa lagala noqon doonnaa ugu yaraan hal sano. Haddii lagugu helo inaad soo cabtay khamri shaatigaaga dib ayaa lagala noqon doonnaa ugu yaraan hal sano amaba ilaa iyo inta aad ka gaarayso da’da 21 sano, hadba mida dheer.

Waxda Baabuurta ee Gobolka New York waxay diiwaangelisaa dembi kaste ee lagu helo daraawal kaste ee New York oo ku saabsan dayacaad, dil amaba weerar lagu gaysto baabuur kaas oo horseeda geeri. Shaatiga daraawalnimo amaba xuquuqda aad uu leedahay inaad baabuur kaxeeyso waa lagala noqon doonaa waxaana sidoo kale laga yaabaa in baabuurka diiwaangelinta lagala noqdo. Iyadoo aan loo egeynin in dembiga uu ka dhacay gobolka amaba gobol kale.

Ka Saarista Meesha iyo kala Noqoshada Qasabka ah

Shaatigaaga daraawalnimo amaba xuquuqda aad uu leedahay inaad baabuur kaxeeyso meesha ayaa laga saari karaa amaba waa lagala laaban karaa iyadoo loo cuskanaayo asbaabo badan. **XUSUUSNOW:** Wadayaasha doomaha iyo gaadiidka barafka ee ay da'dooda ka yar tahay 21 sano ee caba khamri waxay wajihi doonaan isla ganaaxyadaas iyo tallaabooyinka sharciga ah kuwaas oo ka dhan ah xuquuqda ay uu leeyihiin wadida doomaha iyo gaadiidka barafka. Tusaalaha uu baahan yahay sharciga ee keeni karaa in shaatiyada meesha laga saaro amaba gebi ahaanba lala noqdo waxaa kamid ah:

Dembiyada la xiriira isticmaalka Khamriga iyo Maandooriyaha (Sidoo kale eeg [Cutubka 9-aad: Khamriga iyo Daroogada Kale](#))

- In si xun uu qofka uu kaxeeyo baabuur isagoo sarkhaansan (Agg-DWI), oo .18 boqolkiiba hal dhigiisa ay khamri ku jirto(.18 BAC): ugu yaraan hal-sano ayaa lagala laaban doonaa
- Kaxeeynta baabuur iyadoo uu qofka sarkhaansan yahay (DWI), oo .08 boqolkiiba hal dhigiisa ay khamri ku jirto(.08 BAC): ugu yaraan lix bilood ayaa lagala laaban doonaa
- Kaxeeynta baabuur iyadoo awoodda qofka ay saameysay khamri (DWAI): Waxaa shaatiga daraawalnimo meesha laga saari doonaa 90-maalmood
- Kaxeeynta baabuurka iyadoo awoodda qofka ay saameysay daroogo (DWAI-daroogo): ugu yaraan lix bilood ayaa lagala laaban doonaa
- Kaxeeynta baabuur iyadoo uu qofka soo cabay khamri amaba ka soo cunay daroogo dibedda gobolka (DUI): ugu yaraan 90-maalmood ilaa iyo lix bilood ayaa laga laaban doonaa, iyadoo ay ku xiran tahay sida dembiga lagugu helay

Diidmada in laga Baaro Daroogo (Sidoo kale eeg [Cutubka 9-aad: Khamriga iyo Maandooriyaha kale](#))

- Diidmada baaritaanka daroogada, daraawalinta da'dooda ay ka wayn tahay 21 sano: waxaa lagala laaban doonaa ugu yaraan hal-sano
- Diidmada baaritaanka daroogada, daraawalinta da'dooda ay ka wayn tahay 21 sano, iyadoo lagu guda jiro shanta sano ee keentay in horay loogala laabto shaatiga iyadoo ay sabab uu tahay diidmo amaba khamri amaba dembi la xiriira-daroogo: waxaa lagala laaban doonaa ugu yaraan 18-bilood
- Diidmada baaritaanka daroogada, daraawalinta da'dooda ay ka yar tahay 21 sano, ee ay tahay marka ugu horreeysa: waxaa lagala laaban doonaa ugu yaraan hal-sano

- Diidmada baaritaanka daroogada, daraawalinta da'dooda ay ka yar tahay 21 sano, ee ay tahay markooda labaad Waxaa ugu yaraan lagala laaban doonnaa ilaa iyo inta ay ka gaaraayan da'da 21 sano amaba sanad, hadba tan dheer
- Looma dulqadan doonno diidmada baaritaanka: Waxaa lagala laaban doonnaa ugu yaraan hal-sano

Daraawallada ay Da'dooda ka Yar tahay 21 Sano

Haddii ay da'daada ka yar tahay 21 sano markii lagu xiraayay, dembi kaste ee la xiriiro khamri amaba daroogo ee kor lagu soo xusay waxay ku horseedi doontaa in shaatiga lagala laabto ugu yaraan hal-sano. Dembiga labaad ee aad gaysato iyadoo da'daada weli ay ka yar tahay 21 sano waxay uu baahan tahay in shaatiga lagala laabto muddo sanad ah amaba ilaa iyo inta aad ka gaarayso da'da 21 sano, hadba tan dheer. Ganaaxan waxaa lagula kici doonnaa da'yarta gaysta dembiyada, amaba haddii lagugu xiray amaba dembi lagugu helay meel dibedda ka ah gobolka (eeg [Tigidhada Dembiyada dhanka Shuruucda Waddooyinka ee kaga soo Dhaca Dibedda Gobolka](#)).

Marka loo eego "Sharciga Aan loogu Dulqadanaynin," ee gobolka, daraawalka da'diisa ay ka yar tahay 21 sano shaatigiisa ayaa meesha laga saari doonnaa muddo lix bilood ah waa haddii lagu helo BAC uu dhaxeeyso .02 ilaa iyo .07. BAC-ta .02 waxaa keeni karaa oo keliya hal cabitaan. Dembiga marka labaad ee aan loogu dulqaadanaynin, shaatiga daraawalka ayaa lagala laaban doonnaa muddo sanad ah amaba ilaa iyo inta uu daraawalka ka gaaraayo 21 sano, hadba tan dheer.

Baabuurta oo lagu kaxeeyo xawaare sare iyo Dembiyada Kale

Shaatiigaaga darawalnimo ayaa gebi ahaanba meesha laga saari doonaa wax dhan ugu yaraan lix billood haddii lagugu helo dembiga ah:

- Saddex haddii aad xawaare sare ku kaxeeyso baabuurka iyo/ama aad gaysato khalad yar (dembi) ee ah inaad jebisay shuruucda waddooyinka muddo 18 billood gudahood ah (iyadoo lagu saleynaayo taariikhda dembigaasi aad gaysatay, ee ma aha maalinta dembigaas lagugu helay).
- Saddex dembiga ah "inaad dhaafto baska dugsiga ee la joojiyay" saddex sano gudahood.
- Halka dembi "ka cararida goob aad ku dhawacday qof amaba aad ku gashay shil sababay geeri."
- Hal dembi oo ah "inaad ka qayb gashay tartan dhanka xawaaraha ah". In lagugu helo dembiga labaad ee ka qaybgalka tartanka dhanka xawaaraha ah muddo 12 billood gudahood ah waxaa ay keentaa in gebi ahaanba lagala noqdo shaatiga kaxeeynta baabuurta ugu yaraan hal sano.

Caymis La'aan:

Shaatiigaaga darawalnimo ayaa gebi ahaanba lagala noqonayaa ugu yaraan hal sano haddii aad kaxeeyso ama aad uu oggolaato qof kale in uu kaxeeyo baabuurkaaga aan lahayn wax caymis ah, amaba haddii DMV ay hesho caddeyn ah in aad ku lug lahayd shil iyadoo uu baabuurkaagu lahayn wax caymis ah. Haddii caymiska baabuurkaagu uu dhacay, waa in aad soo celisaa taarikada baabuurkaaga iyo dukumeentiga muujinayaa in la diwaangeliyay kuwaas oo aad ku wareejin karto xafiiska baabuurka.

Haddii baabuurka laga saaro wadada oo aan la kaxeysi heynin, waa in aad soo celisaa taarikada baabuurkaaga, haddii aad sidaasi sameyn weydo waxaa lagugu soo dallici karaa ganaax amaba waxaa meesha laga saari karaa diiwaangelinta baabuurkaaga iyo/amaba shaatigaaga darawalnimo.

Wakhti aan cayinnay in meesha laga saaro/Gebi ahaanba lala noqdo:

Shaatiigaaga darawalnimo ayaa sidoo kale wakhti aan cayinnayn meesha laga saari doonaa haddii aad soo sheegi weydo shil aad adiga ku lug lahayd, aad ku wargeliso DMV in ay lacag kala baxan akoon bangi oo aan jirin, aad diido in aad bixiso masruufka ilmaha, aad bixin weydo canshuuraha ama aad uu hoggaansami weydo amar maxkamadeed oo ka dhashay shil aad ku lug lahayd. Tallaabadan meesha looga saaray darawalnimo ayaa sii shaqeyn doonaa ilaa iyo inta aad ka saxeeyso marxaladii keentay in markii horeba meesha laga saaro.

Nidaamka Dhibcaha

Nidaamka Dhibcaha ee DMV waxaa uu ogaanayaa dadka “sida joogtada ah dembiyada uu gaysta”, taas oo ah, daraawallada gaysta dhowr dembi oo xiriir ah muddo gaaban gudaheed. Jaantuuska qaybta ka ah cutubkan waxaa uu sharraxayaa qiimaha dhibcaha loo qoondeeyay dembiyada kala duwan ee la xiriira isku socodka waddooyinka.* Xusuusnow sharciyada waddooyinka kuwaas oo ay tahay in loo hoggaansamo marka la adeegsanaayo waddooyinka dadwaynaha, jidadka iyo kuwa horumara xafadaha waxay sidoo kale ay ka dhaqan galan goobaha baabuurta la dhigto ee uu furan dadwaynaha.

Inkastoo dembi kaste ee la xusay keligiisa uusan ahayn mid culus oo sababi kara in meesha laga saaro amaba qofka lagala noqdo shaatiga daraawalnimo, dhowr dembi oo is-biirsaday ee kuu galay diiwaankaaga daraawalnimo ayaa waxaa ay tilmaami karaan in tallaabo laga qaado.

Qiimaha dhibcaha ee lagugu soo dallacay ee ku jira diiwaankaaga ayaa ah kuwa laga billaabo taariikhda aad gaysatay dembiga, ee ma ahan taariikhda lagugu helay dembiga. Haddii aad hesho 11 dhibic amaba wax ka badan muddo 18 maalmood gudahood, waxaa lagugu soo diri doonaa iimaylka farriin lagugu sheegaayo in shaatiigaaga meesha laga saaray. Waxaad dhagaysiga DMV aad codsan kartaa oo keliya si aad uu mujiso in dembiyada lagugu helay aysan ahayn kuwa adiga aad gashay. Mar kale kama doodi doontid dembiyada lagugu helay amaba ma codsan kartid in laga qaado ganaaxa ku saran iyadoo lagu saleynaayo xaladdo gaar ah.

Waxaad ka yarayn kartaa wadarta dhibcahaaga ilaa iyo afar dhibcood adigoo kaydsanayaa ilaa iyo boqolkiiba 10 lacagaha magdhowga shilalka iyo caymiskaaga shilalka adigoo sameynayaa [Korsada ka Hortagga Shilalka Baabuurta](#) ee ay meel marisay-DMV. Dhammaystirka korsada aad dhibcaha isaga yaraynayso ka ma hor istaagi doonto in shaatiga meesha laga saaraayo amaba lagala laabanaayo ee qasabka ah amaba in loo adeegsado “dayn” ahaan taas oo laga jaraayo dhibcahaaga mustaqbalka, amaba inay ka hortagto amaba hoos uu dhigto Qiimaynta Waajibaadka Daraawalka ee DMV.

Dembiyada Dhibcaha looga jaraayo Shaatiga

XADGUDUBKA	BUUNDOOYINKA
Xawaaraha uu dhaxeeya 1 ilaa iyo 10 MPH ee xadidaada la xusay	3
Xawaaraha uu dhaxeeya 11 ilaa iyo 20 MPH ee xadidaada la xusay	4
Xawaaraha uu dhaxeeya 21 ilaa iyo 30 MPH ee xadidaada la xusay	6
Xawaaraha uu dhaxeeya 31 ilaa iyo 40 MPH ee xadidaada la xusay	8
Xawaaraha ka sarreeya 40 MPH ee xadidaada la xusay	11
Wadista Sida Xun baabuurta ee aan Shaatiga loo haysan 1, 2, ama 3	11
DWI/ DWAI / DWI Sida Xun/ DWAI Daroogada / Diidmada Baaritaanka Daroogada	11
In baabuurka lagu kaxeeyo xawaare iyadoo la joogo Goob uu Dhisme ka socdo	8
Baabuurta uu Dhirirkooda dhaafsiisan yahay Xadka loogu talagalay	8
Inaad ka istaagi weysay baska dugsiga	8

Dembiyada Dhibcaha looga jaraayo Shaatiga

XADGUDUBKA	BUUNDOOYINKA
In si taxadar la'aan ah loo kaxeeyo baabuurka	5
Tartanka iyo Baratanka dhanka Xawaaraha	5
In telefoonka si xun loo isticmaalo	5
In loo adeegsado qalabka elegtarooniga ah ee la qaad-qaadan karo dirista "farriimo"	5
Inaad ku xadgudubto goobta uu wadada ka maro tareenka	5
Inaad isaga cararto Goobta Shilka ee uu Qof ku Dhawacmay	5
Inaad ku guul dareysato in taxadar aad samayso	5
Fududeynta Wadista Sida Xun baabuurta ee aan Shaatiga loo haysan	5
In wadada aad uu banayn weydo baabuurta kale	3
Nalka Casaanka ah	3

Dembiyada Dhibcaha looga jaraayo Shaatiga

XADGUDUBKA	BUUNDOOYINKA
Inaad uu hoggaansami weydo astaanta xakamaynta wadada, astaanta JOOGSO, amaba astaanta WADADA UU BANE	3
In si xun aad uu dhaafto, si aan badqab lahayn uu kala beddelo wadada	3
Inaad baabuur ku kaxeeyso dhinaca bidix ee bartamaha, dhinaca khaldan	3
Inaad isaga cararto goobta uu shil ka dhacay oo lagu burburiyay hanti	3
Dembiga la xiriira badqabka ilmaha	3
Biriigaaga oo aan si fiican uu shaqaynaynin (baabuurka loo shaqeeyaha)	4
Dembiyada kale ee la xiriira isku socodka waddooyinka	2
Inaad bixin weydo astaan	2
In si khaldan aad uu leexato	2

Dembiyada Dhibcaha looga jaraayo Shaatiga

XADGUDUBKA	BUUNDOOYINKA
Inaad uu hoggaansami weydo qalabka xakamaynta isku socodka waddooyinka	3
Muraayadda baabuurka ee la buufiyay	0
Kursiga daraawalka ee aan lahayn suunka lagu xirto/rakaabka 16 jirka ah amaba ka wayn	3
Aan haysan shaati	0
Aan la baarin	0
Agabka ciladaysan	0

Xusuusnow: Shirkadaha caymiska waxay yeelan karaan nidaamka dhibcaha ee iyaga uu gaarka ah
Kuwaan xiriir lama laha mana aha in lagu khaldo nidaamka dhibcaha ee DMV.

*Dhammaan dembiyada Sharciga V&T waxay uu horseedan in daraawalka la ganaaxo taas oo ay uu dheer tahay ganaaxa kale ee la saaraayo shaatiga.

Shilalka Waddooyinka

Xilligan, marka laga reebo meesha uu sharciga faraayo, erayga “shil” waxaa inta badan lagu beddelayaa “burbur.” Tani waxaa sabab uu ah “burburka” cadiyan waa laga hortagi karaa. Haddii aad gasho shil kaas oo sababa geerida qof kale, shaatigaaga meesha ayaa laga saari karaa amaba waa lagala laaban karaa kadib dhagaysiga DMV xitaa haddii marka ay dhacdada dhacday aan wax dembi ah lagugu soo eedeynin.

LACAGAHA IYO GANAAXA AY DOWLADDA SOO ROGTO

Haddii shaatigaaga darawalnimo meesha laga saaray muddo cayiman, tusaale 30 ama 90 maalmood, shaatigaaga dib lagugu ma soo celin doono ilaa iyo inta aad ka bixineyso \$50 oo aaddan dib uu soo ceshan karin taas oo lagu soo afjaraayo tallaabadaas meesha looga saaray shaatigaaga. Diidmada ah

inaad Aqbasho in aad Gaysatay wax Dembi ah: waa in aad bixisaa ganaax lacageed oo ah \$125 iyo \$100 oo lagu soo afjaraayo tallaabadii meesha looga saaray shaatigaaga.

Inta badan, haddii shaatigaaga darawalnimo dib loola noqday, ma codsan kartid shaati cusub ilaa iyo inta aad ka bixineyso \$100 oo aaddan dib uu soo ceshan Karin taas oo aad dib ugu codsaneyso shaatigaaga. Lacagtaas lagaga ma baahno inaad bixiso haddii shaatigaaga dib loola noqday iyadoo ay sabab uu ah inaad baabuurkaas kaxeysay isagoo aan lahayn caymis amaba haddii shaatigaaga lagu siiyay adigoo lagugu xiray shuruudo amaba la xadiday isticmaalkiisa.

Milkiilayaasha Baabuurta - [Waxaa la meel mariyay sharci 2019-ka](#) kaas oo uu oggolanayaa dugsiyada degmooyinka iyo magaalooyinka inay adeegsadan kameerooyinka dhinaca baska dugsiga laga soo dhibaayo ee ay ku qoran tahay astaanta joogso si ganaax loogu soo oogo milkiilayaasha baabuurta ee dhaafa baska dugsiga marka uu istaago isagoo dejinayaa amaba qaadayaa rakaab oo nalalka casaanka ah ay uu shidan yihiin baska dugsiga.

- Dembiga ugu horreeya - ganaax \$250 ah
- Dembiga labaad ee aad gaysato 18 bilood gudahood - ganaax \$275
- Dembiga saddexaad (amaba ka badan) ee aad gaysato 18 bilood gudahood - ganaax \$300

Kadib markii dib loola noqdo shaatigaaga, waa in lacagta ganaaxa ah ee ay dowladda kugu soo rogtay aad siisaa waaxda DMV ka hor inta codsigaaga shaati cusub aan la aqbalin:

- Haddii baabuur aad kaxeysay adigoo aan lahayn caymis ama aad gasho shil iyadoo baabuurkaaga uusan lahayn wax caymis: waa inaad bixisaa ganaax lacageed oo ah \$750.
- Diidmada baaritaanka daroogada: \$500 oo ganaax ah (\$550 if while driving a commercial motor vehicle).
- Diidmada in laga baaro daroogo muddo shan sano gudahood ah kadib markii lagala laabtay shaatigaaga iyadoo ay sabab uu tahay arrimaha la xiriiira khamriga, daroogada amaba haddii horay lagala laabtay iyadoo sabab uu ah diidmada noocan: waa in aad bixisaa ganaax lacageed oo ah \$750.

QIIMAYNTA WAAJIBAADKA DARAWALK (lacagaha dheeraadka ah ee lagu soo rogo dembiyada qaar)

Waxaa intaas dheer ganaax kaste, lacago, tallaabo kaste oo sharci iyo lacagaha dheeraadka ah ee uu qeexayo sharciga, waxaa laga yaabaa inaad bixiso lacagta laga rabo si aad uu qaadata “Qiimaynta Waajibaadka Daraawalka” ee dembiyada qaar ee keena in qofka lagu helo isla dembigaas amaba tallaabo maamul. Oggolaanshahaaga waxbarasho, shaatiga daraawalnimo amaba xuquuqda aad uu leedahay kaxeysayta baabuurta ayaa meesha laga saari doonaa haddii aad lacagahan bixin weydo.

Haddii lagugu helo dembiga ah in aad Si Xun aad uu Kaxeysay Baabuur Adigoo Sarkhaansan (Agg-DWI), Kaxeysay Baabuur Adigoo Sarkhaansan (DWI), Kaxeysay Baabuur Adigoo Awooddaada uu wax Saameeyay (DWAI), Kaxeysay Baabuur Adigoo Awooddaada uu Sameeyay Daroogo, DWAI-khamriga oo ay la socoto daroogo, amaba haddii aad diido inaad soo gudbisoo baaritaanka daroogada, waxaa laga qaadi doonaa lacagta qiimaynta waajibaadka daraawalnimo taas oo ah \$250 sanad kaste saddexda sano ee soo socota.

Haddii lagugu helo mid kamid ah amaba dhowr dembi oo dhanka shuruucda waddooyinka ah ee keenayaa in laga jarto lix dhibic mudada ah 18-bilood oo kaste, waxaa laga qaadi doonaa \$100 sanad kaste saddexda sano ee soo socota. Dhibic kaste oo dheeraad ah ee laga jaro isla mudadaas, waxaa laga qaadi doonaa \$25 oo kale ee ah lacagta dhibic kaste sanad kaste muddo saddex sano. Si aad uu hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida dhibcaha loo qiimeeyo, eeg “[Nidaamka Dhibcaha](#)” ee cutubkan.

Qiimaynta waxay khuseysa wadayaasha baabuurta ee lagu helo dembiyada iyagoo kaxeynayaa baabuurta, iyo mararka qaar, wadayaasha doomaha iyo gaadiidka barafka. Dhamaystirka “Koorasada Ka hortagga Shilalka Baabuurta” ee ay meel marisay-DMV kama hortagayso amaba yaraynayso xisaabida dhibcaha kuwaas oo saamaynayaa Qiimaynta Waajibaadka Daraawalka.

Kaxeeynta baabuurta iyadoo qofka Meesha laga Saaray amaba lagala Laabtay shaatigiisa

Waa fal dembiyadeed in qofka uu kaxeeyo baabuur iyadoo meesha laga saaray amaba lagala laabtay shaatiga, waxaana jiraa ganaax qasab ah ee uu qofka bixinaayo oo uu dhaxeeya \$200 ilaa iyo \$5,000. Waxaad wajihi kartaa in xabsi qasab ah lagu geliyo amaba in si dhow lagula socdo. Baabuurka la kaxeynaayo ayaa la qabsan karaa amaba waa lala wareegi karaa. Ganaaxyada aadka uu daran ayaa lagula kaca daraawalada kaxeeya baabuurta iyagoo sarkhaansan amaba ay saameeyen khamri amaba daroogo iyadoo uu shaatigooda daraawalnimo amaba xuquuqda ay uu leeyihiin inay kaxeeyan baabuur meesha laga saaray amaba lagala laabtay iyadoo ay sabab uu ahayd in horay loogu helay iyagoo cabsan amaba dhacdo la xiriirta-daroogo. Daraawalinta shaatigooda meesha laga saaray 10 jeer amaba wax ka badan iyadoo ay sabab uu tahay inay ku guuldareysteen inay ka jawaaban tigidhada dembiyada dhanka waddooyinka ayaa waxaa lagula kacayaa ganaaxyo culus. Daraawalinta shaatigooda meesha laga saaray 20 jeer amaba wax ka badan iyadoo ay sabab uu tahay inay ku guuldareysteen inay ka jawaaban tigidhada inay wajahaayan eedeymo dembi, xitaa haddii aaddan baabuur kaxeeyneynin xilliga lagu xiraayay.